

Ku Caawi Cunnugaagu Si Uu Ugu DiyaargarooBo Dugsiga

Hawlahaan Adiga iyo cunnugaaga wada qabta. Waqti fiicanna wada qaata!

XURUUF MAGNET AH (BIRTA BIRAH KALE SOO JIIDATO OO KU DHEGTA) IYO LAMBARO

In aad cunnugaaga kala hadashid xuruufaha, lambaradda iyo in aad wax wada qabtaan waxay ka caawinaysaa cunnugaaga si uu u horumariyo dareenkiisa lambarada iyo xuruufaha.

Ku caawi cunnugaaga si uu:

- In uu xuruufaha iyo lambarrada uu u kala saaro kooxo kala duwan. – tusaale intii isku midab ahba gooni u saar, xuruufaha gooni u saar ama lambarrada gooni u saar cunnugaaga hadduu doono ha magacaabo ama yuusan magacaabin
- Xisaabi koox walba meeqa shey ayaa ku jira? Wadajirkoodana waa imesa?
- Waxaad heshaa xuruufo ku jira magaca cunnugaaga. Xuruufahaasi ku dheji frantijeerka

Waxaad khariidada isku aadisaa lambarada iyo xuruufaha magnetka ah



BUUGAAGTA

In aad cunugaaga wax u akhrisid waxay ka caawinaysaa cunugaaga in ay sara u kacdo xirfaddiisa dhagaysiga iyo in uu xiisahiisa sheekooyinka iyo qoraalka sare u kaco.

- Ku dhiirageli cunugaaga in uu kula fadhiisto kulana fiirsado sawiro ama buugaagta sheekooyinka.

Maalmaha hore hawlahaasi waxaad samaysaa 5 daqiiqo. Ka dibna kordhi waqtiga oo ka dhig 10-15 daqiiqo marka uu bilaawo cunugaagu in uu ka

helo waqtiga aad wada joogtaan.

- Waxaad ka hadashaa sawirka iyo sheekadaba.
- Waxaad soo booqataa laybareeriga kuu dhow kana qayb qaado barnaamijyadda halkaasi ka socdo.

KALOORAATI, WARQADO, KOOLLO, MAQASYO

Hawlahaan fanka waxay ka caawinaysaa cunugaagu in uu horumariyo koontaroolka farahiisa iyo sidii farahiisa ugu habyn lahaa in uu wax qoro.

- Ku dhiirageli cunnugaaga in uu kalooratiga ama qalmaanta farta waween wax ku sawiro
- U ogolow cunugaagu in uu sawirrada joornaalada duqa ah jarjaro
- Sawirrada uu jecelyahay ku koolay warqad
- Ku ammaan cunugaagu wuxuu sameeyay kuna dheji meel dadka oo dhan ay ka arkayaan.



DHOOQADA MIDABADA LEH EE CARUURTA KU CIYAARTO (PLAYDOUGH)



Dhooqada midabada leh ee caruurta ku ciyaarto (playdough) iyana waxay ka caawinaysaa ilmaha in ay koontoroolaan farahooda iyo waxyaabaha farahooda u baahan yihiin sidii ay wax u qori lahaayeen.

- Si aad adigu Dhooqada midabada leh ee caruurta ku ciyaarto (playdough) u samaysatid waxaad u baahan tahay waxyaabaha soo socdo:

1 koob bur ah, ½ koob oo cusbo ah, 2 qaado yar oo kreemka tartar (cream of tartar), 1 koob oo biyo ah, 1 qaado yar oo saliid ah iyo waxa raashinka midabbada u yeela

1. Alaabadaasi oo dhan isku dar kuna kari dab meel dhexaad ah 5 daqiiqo
 2. Si fiican isugu walaaq, waxaadna ku riddaa warqad aan ku dhagaynin si ay u qabowdo
 3. Si fiican u rafaq, waxayna diyaar u tahay in la isticmaalo
 4. Waxaad ku riddaa kuna haysataa koob blastik ah oo dabool leh
- **Waxaad tuisaa cunuggaaga sida loo fidiyo waxaadna ka samaysaa dhooqada midabada leh ee caruurta ku ciyaarto (playdough) banooni. Waxaad dhooqada midabada leh ee caruurta ku ciyaarto (playdough) ka samaysaa xuruufo, lambaro iyowaxyaabo kale oo kala duwan.**